

*Sidan 1/Bogga 1*

## **SI SAX AH U KALA SAAR QASHINKAAGA**

*Macluumaad iyo talooyin ku socda qofka degan guri kiro ah*

*Sidan 2/Bogga 2*

### **Noocyada qashinka ee kala duduwan**

Waxa muhiim ah inaad ogaato meela la geynaayo qashinka kala duduwan. Taasi waa ay kala duduwanaa kartaa xaafadaha kala duduwan. Weydii shirkadaada guriga haddii aanad hubin waxa khuseeya meesha aad degan tahay.

### **Sidan u kala saar**

Raac tilmaanta oo eeg waxa qashinkaaka la kala saaraayo iyo meesha la geynaayo. Sida aad dhawaan arki doonto ayaanay wax badan lagu rideyn bacda qashinka ee caadiga ah!

### **Qashinka khatarta**

Qashinka khatarta ayaa ugu muhiimsan iyadoo aad u kala saareyso maadaam uu sumeynaayo dhulka iyo biyaha. Haddii aan qolka bay'ada ee kuu dhow laheyn baaldi lagu ridi karo tusaale ahaan elektarooniga iyo laanbadaha, ayaad qashinkaas geynaysaa goobta qashinka dib looga faa'iideysto ee kamuunka. Waxaad sidoo kale weydiin kartaa tukaanka aad ka soo iibsatey inay dib u qaadaan qashinka. Farmasiiga ayaa tusaale ahaan dib u qaata daawooyinka dhacay iyadoo ay marmar qaar jiraan baaldiyo loogu talo galay elektarooniga yaryar iyo laanbadaha lagu rido tukaanada.

### **DAAWADA**

Daawada ma aha in marnba lagu shubo musqusha ama bulaacada. Reningsverken ayaan ka nadiifin karin maadooyinka khatarta ah, waxay raacayaan biyaha wabiyada. U gee: Farmasiiyada.

### **Kiimikada**

Tusaale ahaan: Rinjiga, dareeraha wax lagu nadiifiyo, xabagta, kuwa godadka lagu buuxiyo, dhalooyinka biifbaafta, saabuunta adag iyo daawada ciddiyaha.

U gee: Baaldi gooni ah oo loogu talo galay kiimikada haddii uu kaasi jiro qolka bay'ada ee meesha aad degan tahay ama xarunta dib uga faa'iideysiga ee kamuunka.

*Sidan 3/Bogga 3*

### **Laanbadaha**

Tusaale ahaan: Laanbada caadiga, laanbada tamarta yar cuna, laanbadaha LED-ga iyo laanbada dhaa dheer.

Laambadihii qaar ayaa waxa ku jira mercury taas oo ah mid ka mid ah sumaha ugu halista badan ee jira.

U gee: Baaldi gooni ah oo loogu talo galay laanbadaha haddii uu kaasi jiro qolka bay'ada ee meesha aad degan tahay ama xarunta dib uga faa'iideysiga ee kamuunka. Waxaad sidoo kale weydiin kartaa tukaanka aad ka soo iibsatey laanbadaha inay dib u qaadaan laanbadahaaga duuga ah.

### **Baytariyada**

Tusaale ahaan: Batariyada yaryar ee isku furan ee ku jira tooshashka, kontaroolada ama aaladaha kombiyuuterka.

U gee: Sanduuqa baytariga ama weelka la midka ah.

### **Elektarooniga**

Tusaale ahaan: Alaabta yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah sida kombiyuterada, TV-yada, Alaabta Alaabta ciyaaraha carruurta carruurta , mashiinada guriga iyo qalabka adeega. Wax kasta oo leh xadhig ama baytari.

Waxa ku jiri kara friyoon ama merkuri, kadmiyum, ledh iyo maadooyinka kale ee waxyeleeya dadka iyo bay'ada.

U gee: Baaldi gooni ah oo loogu talo galay elektarooniga haddii uu kaasi jiro qolka bay'ada ee meesha aad degan tahay ama xarunta dib uga faa'iideysiga ee kamuunka. Waxaad sidoo kale weydiin kartaa tukaanka aad ka soo iibsatey inay dib u qaadanayaan.

### **Alaabta Alaabta Alaabta ciyaaraha carruurta carruurta carruurta ee leh baytariyada lagu sameeyey:**

Marka hore ka saar bayteriga oo ku rid sanduuqa bateriyada. Kadibna ku rid Alaabta Alaabta ciyaaraha carruurta carruurta baaldiga loogu talo galay qashinka elektarooniga.

*Sidan 4/Bogga 4*

### **Waxyaalaha waxa lagu riddo**

Ku dhawaad dhaman wax kasta oo aynu soo iibsano ayaa si uu wax loogu soo baakadeeyay taas oo keenaysa qadhin badan. Dhamaan waxyaalaha wax lagu soo riddo ayaa dib looga faa'iideystaa iyadoo aanad sidaas darteed ku soo ridey qashinka guriga ee aad kala saareyso. Taasi waxay ay tusaale ahaan khuseysaa waxyaalaha caanaha lagu soo shubo, furarka balastiga iyo kartoonaada. Haddii aanad geynin karin waxyaalaha wax lagu riddo meesha aad geynayso qashinka kale ee gurigaaga agtiisa waa inaad raadsato meesha dib uga faa'iideysiga ee kuugu dhow. Inta badan waxa jirta meel sidan oo kale ah oo qaxyar u jirta gurigaaga.

*Talooyin!*

Hubi inaanay hadhaaga cuntadu ku jirin daasadaha iyo waxyaalaha wax lagu riddo, fadalan ka dhaqdhaq. Furarka iyo daboolka ka saar. Kuwaas waxa inta badan lagu ridi karaa baaldiga birta iyo daasadaha. Isku laab ama isku cadaadi kartoona markaas ayaanu boos badan qaadaneyn.

### **Waraqaha wax lagu riddo**

Tusaale ahaan: Baakadaha caanaha, kartoona cabitaanka, bacaha warqad wax lagu qaato, bacaha sonkorta, baakeedka kabaha, warqada musqusha iyo sanaadiqda daasadaha.

U gee: Baaldi gaar ah oo waraqaha wax lagu duubto.

Laakiin aan aheyn: Bushqadaha waraaqaha, waxa lagu ridayaa qashinka guriga ee guban kara. Joornaalada, xayeysiiska iyo wixii la mid ah wax lagu rideyaa baaldiga joornaalada.

### **Joornaalada**

Tusaale ahaan: Wargeysyada, majaladaha, kaataloogyada, warqadaha xayeysiiska, qoraallada yaryar, waraaqo wax lagu sawiro iyo buugta yaryar.

U gee: Baaldi u gaar ah joornaalada

Laakiin aan aheyn: Bushqadaha waraaqaha iyo buugaagta jeldig adag, waxa lagu ridayaa qashinka guriga ee guban kara. Waraaqaha wax lagu qaato ayaan sido kale lagu rideyn baaldiga waraaqaha wax lagu duubto.

*Sidan 5/Bogga 5*

### **Balstiga waxa lagu riddo**

Tusaale ahaan: Dhalooyinka, daasadaha, baaldiyada yaryar iyo daasadaha, bacaha caagga ah, bacaha caagga ah, xirmooyin Midab, tuubooyinka, bacaha jibista iyo buushka alaabta lagu dhowro.

U gee: Baaldi u gaar ah joornaalada balastiga wax lagu duubo.

Laakiin aan aheyn: Alcaabta, jooga casiirka iyo malqaacadaha caaga. Kuwaas waa in bedelkeeda la geeyo goobaha dib uga faa'iideysiga ee kamuunka ama qashinka guban kara ee guriga.

### **Dhalooyinka dib loo celiyo**

Tusaale ahaan: Dhalooyinka cabitaanda iyo dhalooyinka dib loo celiyo ee lacagta lala soo noqdo. U gee: Dukaankaaga cuntada oo aad lacagta qeyb ka mid ah kala soo noqon doonto.

### **Dhalooyinka waxa lagu riddo**

Tusaale ahaan: dhalooyinka iyo daasadaha midabka leh iyo kuwa aan midabka laheyn.

U gee: Baaldi u gaar ah midabka leh iyo kuwa aan midabka laheyn.

Laakiin aan aheyn: Koob wax lagu cabbo, weelka dhoobada iyo waxyalah kale ee aan wax lagu riddan. Kuwaas waa in bedelkeeda la geeyo goobta qashinka waaweyn ama qashinka guban kara ee guriga. Nalalka iyo laanbadaha dhaadheer ayaa sidoo kale la geyneyn meelaha dhalooyinka lagu ururiyo.

### **Biraha waxa lagu riddo**

Tusaale ahaan gasaacadaha, dhalooyinka wax lagu buufiyo ee madhan, tuubooyinka, furuka iyo daboolka birta ah.

U gee: Baaldi u gaar ah joornaalada biraha wax lagu riddo.

Laakiin ma aha: biraha duugga ah, tuunbooyinka balastiga, daawayaasha iyo alaabooyinka kale ee aan aheyn kuwa wax lagu riddo, kuwaas waxa la geynaya goobta qashinka waaweyn ama qashinka dib looga faa'iideysto.

### *Sidan 6/Bogga 6*

Meelo badan oo degaanka ah waxa la kala saaraa birha, laakiin taasi ma aha dhamaan. Qashinka cuntada waxa laga dhigaa gaasta bayoolajiga ama waxa loo dhalan roggaa carro. Si taas loogu guuleysto ayaa loogu baahan yahay kala saarid taxadir leh.

### **Qashinka cuntada**

Tusaale ahaan: Hadhaaga cuntada saxan cashoda, diirkja tufaax, qolofka mooska iyo qolofka carsaanyada. Sidoo kale tishiyuuga, warqadaha la isku tirtirto, hadhaaga qaxwaha iyo bacaha shaaha waxa lagu tiriyaa qashinka cuntada.

U gee: Bacaha gaarka ah oo markaa kadib la geeyo hadhaaga cuntada.

Laakiin aan aheyn: Haadhka sigaarka ama buuriga, kaas waxaad u kala saareysaa sida qashinka guban kara.

### **Marhaya**

Tusaale ahaan: Dharka, kabaha iyo daahyada.

U gee: Dharka dhan ee nadiifta ayaad geyn kartaa meelaha dharka lagu ururiyo. Dharka googan iyo kabaha ayaad ku ridi kartaa qadhinka duban kara ee caadiga ah haddii aanay aad u weyneyn ayaa la geynayaa meelaha qashinka waaweyn ama goobah adibuga faa'iideysiga ee kamuunka.

### *Sidan 7/Bogga 7*

### **Qashinka waaweyn**

Tusaale ahaan: Alaabta guriga ee jajaban, daawayaasha, kartoonaada waaweyn iyo qashinka kale ee waaweyn ee aan lagu ridi karin bacda qashinka caadiga ah.

U gee: Qashinka waaweyn, haddii aanu jirin mid kaas oo kale ah meesha aad ku taalo waa inaad qashinkaaga waaweyn geeyso goobta dib uga faa'iideysiga ee kamuunka. Shirkadaha guryaha waxay sanadkii sameeyaan xiliyo xaaqitaanka iyadgoo meesha keena contaynaro aad ku ridi karto qashinkaaga waaweyn.

Waad ku mahadsansan tahay intad qashinkaaga weyn aanad kaga tageyn khanka hoosta ama qashinka dibada, waxa ay keeni kartaa inuu dab ka bilowdo, ay soo jiidato cayayaanka iyadoo adkeynaysa in la dhaafo. Intaa waxa dheer, haddii aad qashinka kaga tagto meel aan ku habooneyn ayay khatartu ka weyn tahay inay dad badan ku daydaan oo sidoo kale sameeyaan taas oo keeni karta meel degaan qashin leh oo aan fiicneyn.

### **Hadhaaga ...**

#### **Hadhaaga cuntada**

Waxa kaliya ee aad ku ridi karto bacdaada qashinka!

#### **Qashinka guban kara**

Tusaale ahaan: Xafaayadda, suufka dhiiga, suufka caadada, bacaha huuferka, burush wax lagu maydho, baqshadaha, buuriga iyo haashka sigaarka. Waxa aan loo kala sooci karin wax kale ayaa lau ridayaa bacda qashinka caadiga ah iyadoo la gubi doono.

U gee: bacaha qashinka caadiga ah ee aad ku tuurayso baaldiga qashinka guban kara (mararka qaarkood loo yaqaan qashinka hadhaaga ah).

*Shaqo wanaagsan!*

*Sidan 8/Bogga 8*

### **Ka xariifsan qashin yar**

Waxa jira wax badan oo aynu sameyn karno si aynu u dhino qadarka qashinka oo aynu isla markaa lacag u dhino.

Halkan ayaa waxa ku dhigan dhowr talooyin ah:

- soo gado waxyaalo ka tiro yar
- soo iibso duuga
- soo gado waxyaalaha muddo dheer ku haynaaya
- hagaajiso waxyaalaha kaa jaba
- dhowr jeer isticmaal bacda kalastiga ama dukaanka u sii qaado kiish.
- cab biyaha qasabada halka aad ka cabi laheyd biyaha caagada ama daasada
- si wanaagsan u qorshee cuntada aad soo gadaneyso si aad u wada sameysato kahor inta aanay dhicin.

### **Iibi, bedelo ama cid sii**

In la tuuro waxyaalaha la isticmaali karo ayaa ah khasaare. Maanta waxa jirta fursad lagu bedelaayo, lagu iibinaayo ama cid loogu deeqaayo waxyaalaha nadiifta ee aanad rabin. Inta badan ayay tasi tahay ta ugu quman ee tusaale ahaan lagu tuurayo alaabta guryaha. Waxa jira boggag internetka ah oo suurtogaliya waxa kala bedelashada iyo iibka. Blocket iyo Tradera ayaa ka mid ah kuwaas waxa sidoo kale jira koox facebook ah. Waxaad sidoo kale la soo xidhiidh kartaa hayadaha samafalka ee degaankaaga, kuwaas oo qaadi kara qashinkaaga.

Qeybo ka mid ah guriga dadka badan degan yihiin iyo goobaha dib uga faa'iideysiga ah ayaa waxa ku yaala qolka qolka dib u isticmaalka halkaas oo aad keeni karto dhamaan ama aad ka heli karto waxyaalo aad u baahan tahay. Laakiin ka fikir in alaabta guryaha ee jilicdasaan sida kuraasta ama sariiraha ay faafin karaan dukhaanka.

### **Miyaad ogsoontey in:**

**Dhalooyinka waxa lagu riddo** dib looga faa'iideysan karro inta jeer ee la rabbo iyadoo aan tayada waxba iska bedelin. Markaa ayaa la keysanayaa waxyaalaha qaydhiin, soodhada iyo nuuraada. Sidoo kale waxa la galiyaa tamar ka yar in dib looga faa'iideysto dhalada halka mid cusub laga sameyn lahaa.

Dhalooyinka dib looga faa'iideysanayaa waxa ay dhimaan kaarbon dayogsaydhka boqolkiiba 41 marka la garab dhigo in alaabta cusub laga soo saaro.

Waxyaalaha waxa lagu riddo ee ka sameysan kartoonaada kuwaas oo dib looga faa'iideysto markaas oo anynaan u baahneyn inaynu googeyno geedo badan. Hal ton oo waraaqaha dib loo soo celiyo ayaa u dhigma 14 geed. Waxay sidoo kale keydiyaan tamarta iyo kiimikada si loo isticmaalo waraaqaha dib looga faa'iideysto halka mid cusub laga sameyn lahaa. Qiyaas ahaan todoba jeer ayaa warqad dib looga faa'iideysan karaa. 11 daasadaha dib loo celiyo waxay keydiyaan tamar 5 oo la qubeysto.

- Bac qashinka cuntada ayaa noqon karta gaaska bayolojiyada oo ku filan 2,5 kilommitir in gaadhiga lagu kaxeysto.
- Haddii qof kastaa uu soo celiyo furka daasadiisa ayay taasi ku filan tahau 2 200 oo baabuur cusub ah, sanad kasta.
- Iswiidhan ayaa 99% waxyaalaha guryaha dib looga faa'iideytaa,

Laga soo xigtey: Förpacknings- och Tidningsinsamlingen (FTI) iyo [www.sopor.nu](http://www.sopor.nu)

***Waad ku mahadsan tahay intaad ka qeyb qaadanayso!***  
***Wadajir ayaynu u keydsan karnaa tamar oo aynu uga hor tagi karnaa in deegaanka iyo dabeecad la waxyeeleeyo!***